

Badbaadada dabka ee guriga qofka waayeelka ah

Daryeelka badbaadada dabka ee guriga ma aha arrin adag. Talooyinka ku jira buug-yarahan ayaad ka hubin kartaa in arrimaha badbaadada gurigaagu ay hagaagsan yihiin iyo inkale.



Badbaadada shooladda

Dabka ka dhasha cunto karinta ayaa ka mid ah dababka ugu badan ee ka dhaca guryaha.

- Shooladda iyo agagaarkeeda ka ilaali alaabta iyo waxyaabaha kale, oo waa in marwalba aanay wax alaab ah ag oollin.
- La soco shooladda marka ay shidan tahay, hana ka tegin iyadoo aan la ilaalinayn.
- Shoolad leh qalabka badbaadada ama qalabka ilaaliya shooladda (liesivahti) ayaa kordhiya badbaadada.

Qalabka korontada

Isticmaal oo keliya qalabka korontada ee aan cilladda lahayn, raacna hagista ama tilmaanbixinta ku saabsan qaabka loo isticmaalo

- Boorka iyo busta si joogto ah uga nadiifi qalabka korontada
- Qalabka ku shaqeeya batariga waxaad cabbaysaa ama buuxisaa marka aad soo jeeddo oo keliya.

Qalabka dab sheegaha (palovaroin)

Ma maqli kartaa marka dab sheegaha uu qayliyo? Haddii, tusaale ahaan, maqalkaagu uu xaddidan yahay oo aadan si wanaagsan wax u maqlaynin, waxaad isticmaali kartaa qalab gaar ah oo codka ka sokow digniinta kuugu sheegaaya sida gariir ama iftiin biligleynaaya oo kale.

- Si joogto ah u tijaabi in qalabka dab sheegaha uu shaqaynaayo iyo inkale, adigoo riixaaya badhanka tijaabada ah. In aad ku tijaabiso usha dheer ee xaaqinka ayaa ka badbaado badan in aad kursi fuusho.
- Guryaha ay maamusho shirkadda guryaha, shirkadda ayaa mas'uul ka ah in qalabka dab sheegaha uu shaqaynaayo iyo beddelidda batariyada. Guriga qofku uu gaarka u leeyahayna, milkiilaha guriga ayaa ka mas'uul ah.

Dab daminta hore

Dabka waxaa ugu fudud in la damiyo marka uu bilowga yahay.

- Guriga u soo iibso bustaha dabdaminta (sammutuspeite) ama haanta dabdamiska (sammutin)
- Tababar ku qaado sida dabka loo damiyo.

Si ammaan ah uga bixitaanka goobta

Haddii dab ka kaco guriga, waxaa muhiim ah in guriga laga bixi karo iyada oo aan wax caqabad ahi jirin.

- Albaabada laga baxo hortooda ha dhigin wax alaab ah, kuwaasoo qofka ka horistaagi kara ama xannibi kara in uu si ammaan leh uga baxo guriga
- Haddii aad ku nooshahay guri dabaqyo ah (kerrostalo), dabkuna ka kacay guri kale, ha u bixin qaybta jaranjarada ee guryaha dabaqa ah ee qiiqu ka buuxsamay. Waxaad wacdaa lambarka emergjensiga ama xaaladaha degdegga ah ee 112 oo u sheeg guriga aad ku sugan tahay.



Guri ammaan ah waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nololwanaagga qofka. Talooyinka ku jira warqaddan waxay kaa caawinayaan in aad hubiso waxyaabaha aasaasiga ah ee badbaadada dabka ee gurigaaga ama guriga qof kuu dhow. Sidaas ayaad kor ugu qaadi kartaa badbaadada iyo nolol-wanaagga.



Ka eeg macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan badbaadada dabka ee guryaha dadka waayeelka ah:



spek.fi/housing-safety-materials

